

WAX KASTA OO AAD U BAAHAN TAHAY IN
AAD KA OGAATID LIISKA AAN LA
DAABICIN EE COD BIXIYEYAASHA

JAWAABAHA SU'AALAHA KU SAABSAN DIIWAAN GELINTA

COBIXIYEYAASHA GUDAHA

HORUDHAC

Maxuu yahay liiska aan la daabacin?

Yaa arki karo liiska aan la daabacin?

DALABKA DIIWAAN GELINTA LIISKA AAN LA DAABICIN

Yaa xaq u leh in lagu darro liiska aan la daabacin?

Sidee ayaan u codsadaa in leygu darro liiska aan la daabacin?

Macluumaadkee ayaa leyga baahan yahay in aan bixiyo?

Ilaa intee ayaan ku jiri doonaa liiska aan la daabacin?

Maxaa dhaca haddii xaaladaheyga isbaddalaan?

Maxaa dhaca haddii tafasiisheyda shakhsiga isbaddalaan?

COD BIXINTA

Sidee ayaan u cod bixin karaa marka magaceyga uusan ku jirin liiska la daabacay?

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Sidee ayaan ku heli karaa macluumaad badan?

Sidee ayaan ku heli karaa macluumaad badan oo ku qoran luqado kale?

WAA IN AAD KU JIRTID DIIWAANKA SI AAD CODKAADA UGA DHIIBATID

DOORASHOYINKA BARLAMAANKA NEW ZEALAND

Ugu yaraan hal mar saddaxdii sanno, New Zealand waxay qabataa Doorashooyinka Guud (General Election) oo lagu doorto Barlamaan cusub iyo Dawlad. Waxaa jira cod bixiyeyaal Guud iyo Māori. Koox kasta oo cod bixisa waxay haysataa diiwaanka, ama liiska, qof kasta oo ku qoran diiwaanka in uu cod bixiyo. Haddii aad gaartay 18 sanno, ama aad ka weyn tahay, aadna xaq u leedahay in laguugu qoro diiwaanka, sharciga wuxuu leeyahay waa in lagu geliyo diiwaanka. Haddii aad gaartay 17 sanno, waxaad isku qori kartaa diiwaanka si ku meel gaar ah. Kaddib marka aad isku qortid, waa in aad casriyeysid tafasiishaada. Diwaan geliyeyasha dadka cod bixiya, ee u shaqeeya New Zealand Post Ltd, ayaa la socda diiwaanada.

HORUDHAC

MAXUU YAHAY LIISKA AAN LA DAABICIN?

Liiska aan la daabicin wuxuu ka kooban yahay foomamka diiwaan gelinta ee dhamaan cod bixiyeyaasha buuxiyay sharuudaha Diiwaan Geliyaha Sare ee Cod Bixiyeyaasha kuwasoo u baahan in la asturo diiwaanka tafasiishooda shakhsiga bacdamaa daabacaada ay halis gelin karto amaankooda shakhsiga. Diiwaanka tafasiishooda waxaa sugga Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha mana la siiyo qof kale. Kama muuqdaan diiwaanka la daabacay.

YAA ARKI KARA DIIWAANKA AAN LA DAABICIN?

Diiwaanka aan la daabicin waa asturan yahay, waxaana arki karo oo keliya Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha

CODSIGA DIIWAAN GELINTA LIISKA AAN LA DAABICIN?

YAA XAQ U LEH DIIWAANKA AAN LA DAABICIN?

Haddii aad tahay cod bixiye xaq u leh aadna aaminsan tahay in tafasiishaada ku qoran diiwaanka cod bixiyeyaasha la daabacay ay halis gelin karto amaankaada shakhsiga, ama tan qoyskaada, waxaad codsan kartaa in xogtaada lagu darro liiska aan la daabicin.

SIDEE AYAAN KU CODSAN KARAA IN LEYGU DARRO LIISKA AAN LA DAABICIN?

Buuxi foomka “Arjiga diiwaan gelinta Cod Bixiyaha Barlamaanka ee Liiska aan la Daabicin” (“Application for registration as a Parliamentary Elector on the Unpublished Roll”), foomka wuxuu ku qornaan doonaa luqadda Ingiriisiga oo keliya, ee ku yaal dabada buugyarahaan. Haddii aan horay laguugu qorin cod bixiye ahaan, waxaad kaloo u baahan tahay in aad buuxisid foomka diiwaan gelinta ee lagu magacaabo “Diiwaan gelinta cod bixinta: Arjiga” (“Enrolling to vote: Application”).

Waa in labada foom loo dirro (looma baahna tigidhka boostada):

FREEPOST 2 ENROL

Chief Registrar of Electors

P O Box 190, Wellington 6140

MACLUUMAADKEE LOO BAAHAN YAHAY IN AAN BIXIYO?

Waxaa loo baahan yahay in aad bixisid magacaada oo buuxa, taariikhda dhalashada, nambarka telefoonka lagaala xariiro iyo in aad bixisid caddeyn ku saabsan xaaladaada shakhsiga, sida:

- koobiga amarka badbaadinta (protection order) ee iminka jira sida hoos timaado Sharciga Dagaalka ka Dhaco Guriga 1995 (Domestic Violence Act 1995), ama
- koobiga amarka ka celinta (restraining order) ee iminka jira sida hoos timaado Sharciga Kadeedka 1997 (Harassment Act 1997), ama
- amarka laga soo qaado sarkaal ka tirsan boliiska in isaga ama iyada aaminsan tahay

in amaankaada, ama tan qoyskaada, wax soo gaari karaan haddii la daabaco magacaada ama tafasiishaada, ama

- warqad laga soo qaado Qareen ama Lawyer, meesha laga shaqeeyo, maxkamadda Nabadda, ama wixii la mid ah, kuwasoo taageersan arjigaada, kuna saleysan in amaankaada shakhsiga, ama tan qoyskaada, wax soo gaari karaan haddii la daabaco magacaada iyo tafasiishaada.

ILAA INTEE AYAAN KU JIRI DOONAA LIISKA AAN LA DAABICIN?

Waxaad ku jiri doontaa liiska aan la daabicin ilaa inta xaaladaada iska baddaleyso. Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha ayaa muddo kaddib kuu soo qori doono si uu u xaqiijiyo in xaaladahaada aysan isbaddalin. Waxaa kaloo lagaa rabaa in aad iska fiirisid tafasiishaada diiwaanka, aadna baddashid, haddii loo baahdo, inta ay socodaan ololaha casriyeynta.

MAXAA DHACA HADDII XAALADAHEYGA ISBADDALAN?

Haddii xaaladaheyga isbaddalaan, waa in aad qoraal ahaan ku soo ogeysiisid Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha.

MAXAA DHACA HADDII TAFASIISHEYDA SHAKHSIGA ISBADDALAN?

Haddii ay isbaddalaan tafasiishaada diiwaanka, sida, magaca, cinwaanka ama shaqada, ogeysii Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha adiga oo buuxiya foomka “Diiwaan Gelinta Cod Bixinta: Arjiga” (“Enrolling to Vote: Application”). Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha wuxuu qoraal ku xaqiijin doonaa in uu sameyay isbaddalada.

Haddii aad halmaamtid in aad Diiwaan Geliyahaada u sheegtid isbaddalada, magacaada waxaa laga saari doonaa liiska.

COD BIXINTA

SIDEE AYAAN U COD BIXIYAA MARKA MAGACEYGA UUSAN KU JIRIN LIISKA LA DAABACAY?

Bacdamaa magacaada uusan ka muuqanin liiska cod bixinta la daabacay ee Barlamaanka, ee la isticmaalo maalinta cod bixinta, waxaad u baahan tahay in aad bixisid “Codka Ku-dhawaaqidda Khaaska” (“Special Declaration Vote”). Waxaa laga heli karaa Sarkaalka Soo Noqda (Returning Officer) ee cod bixiyeyaasha ka hor inta aan la gaarin maalinta cod bixinta ama waxaa laga heli karaa meel kasta oo laga cod bixiyo maalinta cod bixinta.

Si aad codkaada uga dhiibatid cod bixinta guddiga deegaanka iyo guddiga caafimaadka dagmada, waxaad u baahan tahay in aad arji u qoratid Sarkaalka Cod Bixinta Deegaanka (Local Electoral Officer) ee laga helo guddiga dagmadaada si lagu siiyo “Codka Ku-dhawaaqidda Khaaska” (“Special Declaration Vote”).

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

SIDEE AYAAN KU HELI KARAA MACLUUMAAD BADAN?

Macluumaad badan oo ku saabsan diiwaan gelinta cod bixinta waxaa la heli karaa marka:

- la booqdo boggena internetka – elections.org.nz
- la waco telefoonka lacag la'aanta ah 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56).
- la akhristo buugaagta yaryar
 - Wax kasta oo aad u baahan tahay in aad ka ogaatid diiwaan gelinta cod bixinta (Everything you need to know about enrolling to vote)*
 - Diiwaan gelinta ka hor inta aadan gaarin 18* (Enrolling to vote before you're 18)*
 - Diiwaan gelinta cod bixinta marka aad tahay Māori New Zealand (Enrolling to vote as a New Zealand Māori)*, buugyarahaan wuxuu ku qoran yahay Ingiriisi iyo Maori

* waxaa laga heli karaa PostShops ama xafiisyada Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha.

Waxaan rajeyneynaa in ay ka jawaabtay dhamaan su'aalahaada ku saabsan diiwaanka aan la daabicin.

WAAD KU MAHADSAN TAHAY IN AAD AKHRISATAY BUUGYARAHAN.

LUQADO KALE MA KU HELI KARAA MACLUUMAADKAAN?

Buugyarahaan waxaa laga heli karaa boggena internetka isaga oo ku qoran dhowr luqadood.

Electoral Enrolment Centre
New Zealand Post Limited
P O Box 190
Wellington 6140

Telefoon: 0800 ENROL NOW
(0800 36 76 56)

Faks: (04) 801 0709

Email: enrol@elections.org.nz
Bogga Internetka: elections.org.nz